KABKA DARYEELKA CARUURTA

# Biilka Adeeg-bixiyayaasha Liisanka iyo Cadeynta Haysta ee Guriga iyo Hagaha Lacag-bixinta



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



## Mawduucyada


Hordhac . . . . . 2

Child Care Subsidy Programs (Barnaamijka Kabka Daryeelka Caruurta, CCSP) . . . . . 2

Barnaamijka Working Connections Child Care (Daryeelka Caruurta Xidhiidha Shaqada, WCCC) . . . . 2

Barnaamijka Seasonal Child Care (Xiliyada Daryeelka Caruurta, SCC) . . . . . 2

Barnaamijyada Xanaanada Caruurta ee Daryeelka Caruurta . . . . . 2

Service Employees International Union Local (Ururada Deega Adeega Shaqaalaha Caalamiga, SEIU) . . . . 3

Doorarka iyo Masuuliyadaha Adeeg-bixiyaha LFH . . . . . 3

Masuuliyadaha DCYF . . . . . 3

Masuuliyadaha Qoyska . . . . . 4

Nidaamka Ku Haboonaanshaha Daryeelka Caruurta . . . . . 4

Dabogalka Xaadiriskata Maalinkasta LFH iyo Dalabka . . . . . 5

Heerarka . . . . . 5

Dabogalka Xaadiriska Maalinkasta . . . . . 6

Dalabka Saxda ah . . . . . 6

Sababaha Qeybaha Bilaha . . . . . 9

Gudbinta Codsiga Lacag-bixinta . . . . . 13

Helitaanka Lacagta . . . . . 13

Heerka Daryeelka Caruurta Baahiyaha Gaarka . . . . . 14

Heerka 1 . . . . . 14

Heerka 2 . . . . . 14

Qaladaadka Lacag-bixinta . . . . . 14

Qaladaadka Lacag-bixin Yaraanta . . . . . 15

Qaladaadka Lacag-bixinta Dheeriga . . . . . 15

Lacagta Adeegyada aan la Ogolaan ee Qoysaska . . . . . 17

Siyaasadaha Qoran . . . . . 17

Macluumaadka Cashuuraha . . . . . 18

Xarumaha Barbaarinta . . . . . 18

Jabinta-sharciga Barnaamijka . . . . . 19

Khayraadka . . . . . 19

Macluumaadk Xidhiidhka . . . . . 19

Macluumaadka Onlaaynka . . . . . 20

## Hordhac

Hagahani wuxuu ku siinayaa macluumaadka khuseeya dalbashada kabka Gobolka Washington ee lacagta iyo lacag-bixinta guryaha qoysaska liisanka haysta. Tababarka dalbashada kabku waa diyaar waxayna u baahan tahay ugu yaraan hal mar inta lagu jiro nolosha Service Employees International Union (Adeega Shaqaalaha Caalamiga Ururka, SEIU) 925 Collective Bargaining Agreement (Heshiiska Gorgortanka Guud, CBA) 2023-2025. Tababarka waxaad ku heli kartaa shakhsiyan (Ingiriisi, Isbaanish, ama Soomaali), onlaayn (Ingiriisi ama Isbaanish), ama buug iskaa u akhridid (Ingiriisi ama Isbaanish). Lasoco tababarka diwaanka xaadiriskaaga si aad u cadeysid dalbashadaada. Waxbadan ka ogow tababarkan iyo kabka kale adoo ka wacaaya SEIU 925 halkan 1-877-734-8673. Waxaad sidoo kale u diri kartaa iimayl **ta@imaginewa.org** ama la hadal 206-492-5249 si aad isku diwaangalisid.

Ka wac Adeeg-bixiyaha halkan 1-800-394-4571 haddii aad u baahan tahay caawimo luuqad kale ah. Turjumaan ayaa kusoo biiri kara wicitaanka.

Adeeg-bixiyayaasha Liisanka haysta ee Oregon iyo Idaho ee buuxiya shuruudaha liisanka ee gobolada ayaa ku haboonaan kara lacag-bixinta kabka caruurta gobolka Washington ee caruurta ku haboon kuna nool Washington.

## Child Care Subsidy Programs (Barnaamijka Kabka Daryeelka Caruurta, CCSP)

### Barnaamijka Working Connections Child Care (Daryeelka Caruurta Xidhiidha Shaqada, WCCC)

Barnaamijka WCCC wuxuu ka caawiyaa qoysaska ku haboon inay bixiyaan lacagta daryeelka caruurta si waalidku uga qeyb qaadan karo hawlaha sida shaqada, tababarka, barnaamijyada waxbarasho, iyo hawlaha Temporary Assistance for Needy Families (Caawimada Kumeel-gaarka ah ee Qoysaska Baahan, TANF). Adeeg-bixiyayaasha liisanka haysta ama shahaado iyo adeeg-bixiyayaasha Family, Friends, and Neighbor (Qoyska, Asxaabta, iyo Jaarka, FFN) ayaa ku haboonaan kara inay bixiyaan daryeelka caruurta ee ay lacagtiisa bixiso WCCC.

### Barnaamijka Seasonal Child Care (Xiliyada Daryeelka Caruurta, SCC)

Barnaamijka SCC wuxuu u adeegaa qoysaska ku haboon ee xiliyada qaar laga shaqaaleysiiyey shaqooyinka beeraha. Shaqaalaha xiliyada ayaa ku haboonaan kara WCCC. Qoysasku waxay codsan karaan barnaamijka si weyn ugu haboon baahiyaha daryeelka caruurtooda. Kaliya adeeg-bixiyayaasha liisan ama shahaado haysta ayaa ku haboon inay siiyaan daryeelka caruurta ee uu lacagtiisa bixiyo barnaamijka SCC.

SCC wuxuu siiyaa adeegyo qoysaska ku haboon ee ku nool degmooyinka soo socda: Adams, Benton, Chelan, Douglas, Franklin, Grant, Kittitas, Okanogan, Skagit, Walla Walla, Whatcom, iyo Yakima.

### Barnaamijyada Xanaanada Caruurta ee Daryeelka Caruurta

Shakhsiyaadka helaaya adeegyada barnaamijyada Waalidka Xanaanada ee la Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Caruurta, iyo Xanaanda Caruurta ayaa ku haboonaan kara in laga caawiyo bixinta lacagta adeegyada daryeelka caruurta. Shaqaalaha bulshada ee loo igmaday Xanaanada Caruurta ayaa dhameystiraya ku haboonaanshaha, ansixinta adeeg-bixiyaha, iyo ogolaanshaha lacagta.



## Service Employees International Union Local (Urur Deegaan Adeega Shaqaalaha Caalamiga, SEIU)

SEIU Maxaliya 925 (SEIU 925) wuxuu matalayaa Licensed Family Home (Guriga Qoyska Liisanka haysta, LFH) iyo adeeg-bixiyayaasha FFN ee kabka ka helaaya lacag-bixinta CCSP, Barnaamijyada Employed Foster Parent, Child Protective, (Waalidka Xanaanada ee la Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Caruurta) iyo Child Welfare (Xanaanda Caruurta). CBA waxay kala xaajootay SEIU iyo gobolka Washington qorshayaasha saadka iyo kabka ee xubnaha SEIU 925. Si aad waxbadan uga ogaatid kabka gaarka sida tababarka iyo magdhowga waxbarashada, ka wac SEIU 925 halkan 1-877-734-8673.

Iyadoo laga helaayo ogolaansho saxa xubinimada ururka, xubnuhu waxay bixinayaan lacagaha 2% adeegyada daryeelka caruurta ee uu bixiyo gobolku. Lacagaha waxa la bixinayaa ugu badnaan $50 bishiiba.

Qandaraaska CBA waxa lagaga helayaa onlaayn websaaydka Xafiiska Maamulka Maaliyada: **https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf**.

## Doorarka iyo Masuuliyadaha Adeeg-bixiyaha LFH



Ahaanshaha adeeg-bixiyaha daryeelka caruurta LFH, waxaad leedahay door gaara oo ku aadan caruurta daryeelkaaga ku jirta. Washington State Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska Gobolka Washington, DCYF) waxa ka go'an caawintaasi iyadoo u abuuraysa doorar asaasiyada iyo masuuliyado dhammaan adeeg-bixiyayaasha.

Hagahani wuxuu kaa caawin doonaa inaad fahamtid doorarka iyo masuuliyadaha ilaalinta xaadiriska iyo dalbashada saxda ee gobolka. Waxa lagaaga baahan yahay inaad:

1. Buuxusid shuruudaha liisanka daryeelka caruurta guriga qoyska ee Washington
2. Buuxisid shuruucda iyo shuruudaha kabka daryeelka caruurta
3. Haysatid diwaanada xaadiris dhameystiran oo saxa shan sano marka loo eego qawaaniinta liisamada
4. Isticmaashid nidaamka ilaalinta diwaanka xaadiriska DCYF ama DCYF ee la ansixiyey
5. Raac dhammaan Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC), oo ay ku jiraan 110-15-0034, iyo 110-15-0036 markaad dalbatid lacag-bixinta
6. Kasoo ururisid qeybaha lacagta aad bixisid toos qoyska ama dhinaca saddexaad ee qoyska oo usoo sheeg DCFY 60 maalmood gudohood haddii aan la bixin
7. Soo sheegtid maalmaha xidhnaanshaha, maalmaha aad u xidhay sababo aan ka ahayn shanta maalmood ee horumarinta xirfada, ama maalmaha fasaxa la ogol yahay, ka hor wakhtiga kama danbeysa ee qaansheegta bilaha

## Masuuliyadaha DCYF

- Waxay go'aamiyaan oo qoraan siyaasada iyo shuruucda ku haboonaanshaha WCCC
- Waxay maamulaan CBA ee LFH iyo adeeg-bixiyayaasha FFN
- Waxay ugasoo warbixiyaan dawlada fadaraalka Washington CCSP
- Waxay baadhaan xaadiriska iyo diwaanada dalabka diwaanada si loo qiimeeyo in ay jiraan lacag-bixino dheeriya ama lacag-bixin yar
- Waxay siiyaan qoysaska iyo adeeg-bixiyayaasha ugu yaraan 10 maalmood oo jadwalka ogeysiiska marka la yareynaayo ama la joojinaayo kabka ka hor taariikhda saxda ee dhamaadka Ogeysiiska Adeega Bulshada
- Waxay toos ula shaqeeyaan qoysaska si loo go'aamiyo ku haboonaanshohooda adeegyada daryeelka caruurta
- Waxay ansixiyaan oo u diraan lacagta kabka daryeelka caruurta adeeg-bixiyayaasha
- Waxay ka jawaabaan su'aalaha la xidhiidha ku haboonaanshaha qoyska, ogolaanshaha, iyo lacag-bixinta

## Masuuliyadaha Qoyska

Qoyska codsada ama hela kabka CCSP wuxuu leeyahay masuuliyadaha oo shuruud u ah helitaanka kabkan. Adeegyadan waxa ku jira, aanse lagu koobin:

- Dhameystirka nidaamka codsiga iyo gudbinta foomamka xaqiijinta daruuriga ah ee loogu baahan yahay in lagu go'aamiyo ku haboonaanshaha
- Bixinta lacagta ama sameynta diyaarinta si loo bixiyo badhka lacagta bilaha
- Qorida xaadiriska caruurta ee nidaamka xaadiriska ama u helida qof loo ogol yahay inuu galiyo kana saaro cunuga
- Soosheegida isbadellada adeeg-bixiyayaasha shanta maalmood gudahood
- Codsashada daryeelka dheeriga ah ee hawlaha la ansixiyey

## Nidaamka Ku Haboonaanshaha Daryeelka Caruurta

1. Shakhsiga raba in laga caawiyo lacag bixinta daryeelka caruurtu wuxuu ku codsan karaa isagoo:
   - Wacaya Xarunta Xidhiidhka Kabka Daryeelka Caruurta DCYF ee gobolkoo dhan 1-844-626-8687
   - La xidhiidhaya shaqaalahiisa bulshada ee loo igmaday Xanaanada Caruurta
   - Ka dhameystiraya codsiga onlaaynka **https://www.washingtonconnection.org/home/**
2. DCYF waxay ururisaa oo dib u eegtaa macluumaadka si ay u go'aamiso u qalmitaanka qoyska
3. Marka ku haboonaanshaha loo go'aamiyo qoysaska CCSP waxay ka helayaan warqad DCYF. Warqada ku haboonaanshaha waxa ka mida taariikhaha bilowga iyo dhamaadka ee ku haboonaanshaha iyo xadiga badhka lacagta bilaha
4. Qoysaska ku haboon waxay isticmaali karaan Jawaabta Tilifoonka (1-844-626-8687) si ay u hubiyaan codsigooda daryeelka caruurta iyagoo taabanaya 1 ka dibna wacaya Xarunta Xidhiidhka CCSP. Qoysasku waxay u baahan doonaan nambarka Aqoonsiga macmiilka ama Social Security Numer (Lambarka Adeega Bulshada) waxaanay ka hubin karaan in:
   - Codsiyadooda la ansixiyey, la diiday, ama gacanta lagu hayo
   - Xaalada dukumentiyada laga helay DCYF
   - Taariikhaha bilowga iyo dhamaadka ku haboonaanshaha
   - Adeegyada daryeelka caruurta ee la ansixiyey
   - Xadiga badhka lacagta ee bilaha
5. Adeeg-bixiyayaashu waxay sidoo kale hubin karaan xaalada codsiga qoyska iyagoo isticmaalaya Working Connections Information Phone (Tilifoonka Macluumaadka Xidhiidhka Shaqada, WCIP) (1-866-218-3244). WCIP waxa la helayaa 24 saac maalintiiba, todobo cisho todobaadkii oo Ingiriisi iyo Isbaanish ah. Si aad u isticmaashid WCIP, waxaad u baahan doontaa:
   - SSPS nambarka adeeg-bixiyaha daryeelka caruurta
   - Employee Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha, EIN)
   - Lambarka codsiga qoyska ee laga helayo ogeysiiska SSPS

   Asturnaanta awgeed, macluumaadka qoyska qeybo ka mida ayaa laga yaabaa inaanad helin. WCIP waxay kuu ogolaanaysaa inaad hubisid kuwan soo socda:
   - Xaalada codsiyada – la ansixiyey, la diiday, gacanta lagu hayo, la xidhay, ama liiska sugitaanka ku jira
   - Taariikhaha dhaqangalka ee adeega
   - Adeegyada daryeelka caruurta ee la ansixiyey
   - ’ Xadiga badhka lacagta ee bilaha ee qoyska
   - Fariin kasta oo gaara lana xidhiidha barnaamijyada kabka
6. DCYF waxay u diraysaa xidhmo dibu codsi qoysaska ka hor intaan mudada ku haboonaanshuhu dhamaan. DCYF ma bixin doonto lacagta daryeelka dhaafay mudadii ku haboonaanshaha ilaa qoyska la go'aamiyo inuu ku haboon yahay. Qoysku wuxuu masuul ka yahay lacag-bixinta adeegyada daryeelka caruurta ee hakadka ku haboonaanshaha iyaagoon caawimo ka helin DCYF. Ku haboonaanshaha daryeelka caruurtu laguma qoraayo taariikhda hore marka qoysasku dib u codsadaan ka dib marka taariikhda ku haboonaanshuhu dhamaato

# Dabogalka Xaadiriskata Maalinkasta LFH iyo Dalabka

## Heerarka

Heerarka kabka daryeelka caruurta deegaanka ee ugu badan waxa go'aamiya gobolka halka deegaanka daryeelka laga bixiyey (fiiri maabka boga soo socda), da'da cunuga, xadiga daryeelka loo baahan yahay, iyo nooca daryeelka.

DCYF waxay u ogolaanaysaa dhamaan heerka daryeelka qeyb bile ahaan. Qeybaha bilaha waxay ku saleysan yihiin maalin dhameystiran oo la daabacay, maalin badhkeed, ama heerarka maalinta qeyb ka mida.

Haddii lagaa qaado lacag saacadle, todobaadle, ama bile ah, heerarkaaga waxa loo badelayaa qeybaha maalin badhkeed iyo maalin dhameystiran sida soo socota:

- Qeybaha maalin badhkeed waxa loo isticmaalaa marka cunugu u baahan yahay wax ka yar shan saac maalintiiba daryeelka
- Qeybaha maalin dhameyskatiran waxa loo isticmaalaa marka cunugu u baahan yahay inta u dhaxaysa shan iyo 10 saac maalintiiba daryeelka

### SAACADLAHA

- Qeybta maalin badhkeed = Heerka saacadlaha x 5
- Qeybta maalin dhameystiran = Heerka saacadlaha x 10
- Tusaale: Haddii aad ku qaadatid lacag $3 saacadiiba, heerka maalin badhkeed waa $15 maalintaada dhameyskatiran waa $30


### TODOBAADLE

- Haddii aad ku qaadatid heerka todobaadlaha, DCYF waxay u qeybisaa heerka tirada maalmaha aad furan tahay todobaadkaasi
- Tusaale: Haddii aad furan tahay shan maalmood todobaadka oo lagaa qaado $200 todobaadkii maalmaha oo dhan, heerka maalinta oo dhan waa $40

### BISHIIBA

- Haddii aad ku qaadatid heerka bilaha, DCYF waxay u qeybisaa heerka 22 caruurta aan da'da dugsiga ahayn
- Tusaale: Haddii aad ku qaadatid $450 caruurta aan ahayn da'da dugsiga ahayn bishiiba, heerkaagu wuxuu noqonayaa $20.45 maalinta oo dhameystiran. Haddii aad ku qaadatid $200 caruurta aan ahayn da'da dugsiga ah bishiiba, heerkaagu wuxuu noqonayaa $9.09 maalinta badhkeed

## Maabka Heerarka Kabka Daryeelka Caruurta ee Gobolka




- Gobolka 1
- Gobolka 2
- Gobolka 3
- Gobolka 4
- Gobolka 5
- Spokane Coutty
- Gobolka 6

**Kaliya xarumaha daryeelka caruurta:**

- Degmada Clark waa Gobolka 6 lakiin waa Gobol lagu bixiyaa lacagtiisa heerarka 3.
- Degmooyinka Benton iyo Walla Walla waa Gobolka 2 lakiin waxa lagu bixiyaa lacagtooda heerarka 6.
- Degmada Clark waa Gobolka 1 lakiin waa Gobol lagu bixiye lacagtiisa heerarka 6.



## Dabogalka Xaadiriska Maalinkasta

Waa inaad isticmaashaa Nidaamka Xaadirska Elektarooniga ee ay bixisay DCYF ama isticmaal nidaamka xaadiriska elektarooniga gacanta saddexaad ee ay ansixisay DCYF. Markaad isticmaalaysid nidaamka xaadiriska elektarooniga, qoyska, ama shakhsiga qoyska ee la ogolyahay, waa inuu qoraa imaanshaha iyo ka tagitaanka cunuga ee adeeg-bixiyaha daryeelka cunuga ee nidaamka xaadiriska elektarooniga. Macluumaadka khuseeya xaadiriska elektarooniga waxa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system**.

Adeeg-bixiyayaasha isticmaalaya nidaamka deegaanka, waa inay gudbiyaan dhaqdhaqaaqyada dhammaan xaadiriska maalinlaha iyagoo maraya nidaamkaaga elektarooniga ka hor intaan loo dirin codsiga SSPS ee lacag-bixintaada. Macluumaadka sida loo isticmaalaayo nidaamka deegaanka, fiiri nidaamka manuwalka **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASManual.pdf**.

## Dalabka Saxda ah

DCYF waxay u diraysaa dukumentiyadan soo socda marka laguu ogolaado lacagaha kabka daryeelka caruurta:

1. Warqada Ogolaanshaha Adeeg-bixiyaha, taaso tixi doonta xadiga badhka lacagaha bilaha, haddii wax jiraan, lagugu leeyahay adega bilaha qoyska
2. Ogeysiiska Adeega Bulshada
3. Qaansheegta bilaha ee dalabka
4. Rasiidka bilaha ee lacagta talada diritaanka)

Haddii warqaduhu leeyihiin wax qaladaada ah, wac Adeeg-bixiyaha DCYF Laaynkiisa 1-800-394-4571 si aad u saxdid:

1. Magaca adeeg-bixiyaha iyo lambarka adeeg-bixiyaha SSPS
2. Adeegyada la Ogolaaday
3. Magacyada Caruurta
4. Tirada qeybaha (saacadaha) iyo heerka saacadaha ee cunug kasta
5. Taariikhda bilowga iyo dhamaadka ogolaanshaha
6. ' Xadiga badhka lacagta ee bilaha ee qoyska

Waxaad sidoo jale heli doontaa Ogeysiisyada Adeega Bulshada marka isbadellada ogolaansha lagu sameeyo ama marka kabka daryeelka cunugu dhamaado. Si aad ugu heshid ogeysiisyada iimayl ee bilaabida ogolaanshaha, isbadelka, ama taariikhaha dhamaad, waxaad la xidhiidhi kartaa Adeeg-bixiyaha DCYF Khadkiisa 1-800-394-4571 ama iimayl u dir **providerhelp@dcyf.wa.gov** oo sii ciwaanka iimaylka. Waxbadan ka ogow SSPS halkan **www.dcyf.wa.gov/services/ssps**.

Dalbashada qaansheegta waxa laguugu soo dirayaa Boostada Mareykanka, badanka ka hor maalinta u danbeysa bil kasta. Qaansheegta koobaad ee ogolaanshaha cusub waxa laga yaabaa inaanay iman ilaa badhtamaha bisha xigta. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa qaansheegta Goobta Adeeg-bixiyaha Wabsaaydka SSPS.

Markaad heshid qaansheegta, dibu eeg diwaanada xaadiriska elektarooniga si aad u go'aamisid tirada qeybaha si aad u dalbatid xaadiriska cunuga iyo ogolaanshaha. Adeegyada aad si saxa u dalban kartid waxa ka mida kuwan soo socda:

## QEYBAHA BILAHA

Dhaqangalinta Julaay 2021, dhammaan lacagaha heerarka ee guryaha qoysaska liisanka haysta waxa loo ogolaan doonaa loona bixin doonaa qeybo bile ah. Adeeg-bixiyayaashu waxay dalban karaan qeybaha bilaha haddii cunugu ku jiro daryeelka maalintii ee uu daboolay ogolaanshuhu. Haddii ogolaanshuhu ka yar yahay bil dhameystiran, nidaamka ayaa si toosa ugu sixi doonaa maalmaha la ogol yahay ee bisha.

1. **Qeybaha Bilaha Labada Galinka** waxa la ogolaadaa marka:
   - Cunugu ku haboon yahay ogolaanshaha labadaba galinka ee ku saleysan jadwalka qoyska
   - Cunuga waxa loo qorsheeyey inuu ku jiro daryeelka adeeg-bixiyaha labada galinba (ama labada galinba xagaaga caruurta da'da dugsiga)
   - Cunuga waxa loo ogolaaday daryeelka kaliya hal adeeg-bixiye
   - Qeybta bilaha labada galinba waxay ku filan tahay daryeelka la qorsheeyey ee cunuga inay daboosho
2. **Qeybaha Bilaha Labada Galinba** waxa loo ogolaaday dhammaan daryeelka aan buuxin shuruuda ogolaanshaha labada galin
3. **Qeybaha Bilaha Dheeriga ah** waxaana loo ogolaan karaa:
   - Wakhti dheeriya oo la qorsheeyey: La ogolaaday kaliya haddii wakhti dheeriya la qorsheeyey oo qeybta biluhu aanay ku filnayn inay daboosho wakhtiga dheeriga ee la qorsheeyey
   - Wakhtiga hurdada la qorsheeyey: La ogolaaday kaliya haddii wakhti hurdada la qorsheeyey la ogol yahay oo qeybta biluhu aanay ku filnayn inay daboosho wakhtiga hurdada ee la qorsheeyey
   - Daryeelka kumeel-gaarka ah ee hawlaha la ansixiyey: Waxa loo ogolaan karaa maalin badhkeed ama in ka badan saddex bilood ama hawlaha la ansixiyey ee aan la filayn in la qorsheeyo bilkasta mudada ku haboonaanshaha qoyska



4. **Qeybaha Bilaha, Da'da Dugsiga aan Ahayn:**

   **Qeybtaha Bilaha Labada Galinba:** Waxa loo isticmaalaa marka cunug ku haboon yahay ogolaanshaha labada galinba. Waxay u dhigantaa 22 maalmood oo dhameystiran. Waxa sidoo kale loo isticmaali karaa cunuga da'da dugsiga ee la qorsheeyey daryeelka maalinta oo dhan ee maalmaha dugsiga joogtada ah. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Labada Galinba haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

   **Qeybtaha Bilaha Hal Galin ah:** Oo ku saleysan tahay celceliska maalmaha dhameyskatiran iyo kuwa badhka ah ee lala qorsheeyey adeeg-bixiyaha. Ogolaanshaha Qeybta Bilaha Hal Galin waxay ka badnaan kartaa xadiga ogolaanshaha labada galin ee ku saleysan daryeelka cunuga ee la qorsheeyey ee hawsha la ansixiyey. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Hal Galin haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

5. **Qeybaha Bilaha, Da'da Dugsiga:** Ogolaanshaha adeeg-bixiyaha koobaad ee caruurta da'da dugsiga ah waxa ku jira 50 maalmood oo labada galinba ah celceliska sanad dugsiyeedka (lacagtoodana loo bixiyo shan maalmood oo dhameystiran ahaan bishii). Shanta maalmood ee dhameyskatiran waxa lagu daraa ogolaanshaha haddii cunuga loo qorsheeyo daryeelka adeeg-bixiyaha inta lagu jiro saacadaha caadiga ee dugsiga marka dugsigu aan la dhiganeyn. Haddii cunuga loo qorsheeyey in ka badan 50 maalmood mudada casharka sanad dugsiyeedka, waalidku waa inuu weydiistaa DCYF inay dibu xisaabiyaan maalmaha saxda ee dhameyskatiran iyo ku badhka ah ee looga baahan yahay sanadka oo dhan.

   **Qeybta Bilaha Maalinta Badhka ah Labada Galin:** Waxa la isticmaalaa marka cunuga da'da dugsiga ah ku haboon yahay ogolaanshaha labada galinba, aanu u baahneyn daryeelka ka badan shan saac inta lagu jiro maalinta dugsiga labada galinba, ee uu u baahan yahay daryeelka ka hor iyo ka dib dugsiga celcelis ahaan saddex maalmood ama in ka badan todobaadkiiba. Qeybta bilaha waxay leeg tahay 17 maalmood qeyb ahaan iyo shan maalmood oo dhameystiran bishiiba Sabteembar – Juun iyo 22 maalmoo oo dhameystiran Julaay iyo Ogos. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Maalinta Badhka Labada Galinba haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

   **Qeybta Bilaha Maalinta Badhka ah Hal Galin:** Waxa loo isticmaalaa marka cunuga da'da dugsigu ku haboon yahay ogolaanshaha labada galinba ee uu u baahan yahay daryeelka ka hor iyo ka dib dugsiga hal maalin ama in ka badan todobaadkiiba. Oo ku saleysan celcelisa daryeelka qorsheeyey ee saxda ah. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Maalinta Badhka Hal Galinba haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

   **Qeybta Bilaha Da'da Dugsiga ee Labada Galin:** Waxa la isticmaalaa marka cunuga da'da dugsiga ah ku haboon yahay ogolaanshaha labada galinba, aanu u baahneyn daryeelka ka badan shan saac inta lagu jiro maalinta dugsiga labada galinba, ee uu u baahan yahay daryeelka ka hor ama ka dib dugsiga celcelis ahaan saddex maalmood ama in ka badan todobaadkiiba. Qeybta bilaha waxay leeg tahay 17 maalmood badh ahaan iyo shan maalmood oo dhameystiran bishiiba Sabteembar – Juun iyo 22 maalmoo oo dhameystiran Julaay iyo Ogos. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Da'da Dugsiga Labada Galinba haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

   **Qeybta Bilaha Da'da Dugsiga ee Hal Galin:** La isticmaalo kara cunuga da'da dugsigu aanu ku habooneyn shuruud kale oo aan ka ahayn da'da dugsiga. Oo ku saleysan celcelisa daryeelka qorsheeyey ee saxda ah. Waxaad dalban kartaa "1" Qeybta Bilaha Da'da Dugsiga Hal Galin haddii la ogolaado, cunuga waa loo qorsheeyey wuxuuna ku jiray daryeelka wakhtiga uu ogolaanshuhu daboolay. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

   Caruurta da'da dugsiga ee loo qorsheeyey daryeelka maalintii oo dhan maalmaha joogtada ee dugsiga ayaa ku haboonaan kara Qeybta Bilaha Labada Galinba.

6. **Qeybta Bilaha Wakhtiga-dheeriga:** Loo ogolyahay marka macmiilku ku jiro hawl la ansixiyey oo ka badan 10 saac maalintii, oo qeybta bilaha aanay ku jirin maalmo dhameystiran iyo kuwa badha oo ku filan inay daboolaan daryeelka. Caruurta qaar ayaa u baahan daryeelka badan 10 saac maalintii. Si ay u codsadaan daryeelka caruurta ee dheeriga, qoysku waxay la xidhiidhayaan DCYF waxayna siinayaan qoraalka muujinaya saacadaha dheeriga ee loo baahan yahay. Waxa lagaa bixin karaa nooca daryeelkan. DCYF waxay bixisaa daryeelka dheeriga ee ugu badnaan heerka kabka daryeelka cunuga ee gobolka ilaa 15 saac. Waxaad codsan kartaa “1” qeyb bille ah oo dheeraad ah haddii la oggolaado, ilmuhu wuxuu ku jiray daryeelka saacadaha dheeraadka ah ugu yaraan hal maalin bishii, waxaana loo qorsheeyay saacadaha dheeraadka ah. Si loo dalbado “1” qeybta bilaha, gali “1” sanduuqa”Wadarta Qeybaha” ee qaansheegta.



7. **Qeybtaha Bilaha Wakhtiga Hurdada:** Loo ogolaaday celceliska tirada maalmaha la filaayo ee wakhtiga hurdada qoysku ku haboon yahay loona qorsheeyey. Waxaad dalban kartaa "1" qeybta bilaha wakhtiga hurdada haddii la ogolaado, cunuga ku jiray daryeelka ugu yaraan hal maalin oo wakhti hurdo ah bishii, taasoo loo qorsheeyey wakhti hurdada. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.
8. **Qeybta Bilaha Daryeelka Kumeel-gaarka:** Loo ogolaaday hawlaha aan la qorsheyn ama la qorsheeyey ee aan la filayn in la sii wado dhammaan mudada ogolaanshaha. Waxaad dalban kartaa "1" qeybta bilaha wakhtiga kumeel-gaarka haddii la ogolaado, cunuga ku jiray daryeelka ugu yaraan hal maalin oo daryeelka kumeelgaadhka ah bishii, ee loo qorsheeyey daryeelka uu daboolay ogolaanshaha daryeelku. Si loo dalbado "1" qeybta bilaha, gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

## Sababaha Qeybaha Bilaha

Qeybaha bilaha waxay ka kooban yihiin lacag-bixinta dhameyskatiran, badhka ah, iyo maalmaha badhka ah ee hoos lagu sharxay.

- Maalin Dhameystiran – ee 5-10 saac oo daryeela
- Maalin Badhkeed – ilaa 4 saac iyo 59 daqiiqo
- Maalin Badh ah – marka daryeelka hal maalin loo kala jabiyo kulanka subaxa iyo kulanka galinka danbe. Kulanka subaxa ee wakhti kasta maalinta oo dhamaanaya duhurka. Kulanka galinka danbe oo bilaabmaya hal ilbidhiqsi ka dib duhurka

### LACAG-BIXINTA QEYBTA QOYSKA

Inta ugu badan qoysasku waa inay sameeyaan bixinta badhkooda lacagta qeybta kharashka daryeelka bilaha. Qoysku wuxuu masuul ka yahay inuu ku siiyo badhkooda lacagta bilkasta. Qoysku wuxuu yeelan karaa lacag-bixin badhkooda oo loo asteeyey adeeg-bixiye kale, ama waxa loola kala jabin karaa dhowr adeeg-bixiye. Haddii loo igmaday lacag-bixinta badhka qoyska, oo aanad helin lacagta, waa inaad ugusoo sheegtaa 60 maalmood gudohood Adeeg-bixiyaha DCYF Khadka 1-800-394-4571 ama iimayl ugu dir **providerhelp@dcyf.wa.gov**.

### MAALMAHA MAQNAANSHAHA

Marka cunug loo ansixiyey kabku uu ka qeybgalo ugu yaraan hal maalin jadwalka bisha ee mudada ogolaanshaha, waxaad xaq u leedahay inaad dalbatid heerka bilaha qeybta la ansixiyey. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad dalbatid wakhtiga dheeriga, wakhtiga hurdada, ama daryeelka kumeel-gaarka ee bilaha qeybta la ansixiyey haddii cunugu isticmaalay ugu yaraan hal maalin wakhti dheeriya, wakhti hurdo, ama daryeelka la ogolaaday ee qeybta daryeelka kumeel-gaarka bilaha.

Qeybta bilaha waxay qiimeynaysaa haddii ogolaanshuhu bilaabmo ka dib maalinta koobaad ee bisha ama dhamaado ka hor maalinta u danbeysa ee bisha.

"Loo qorsheeyey inuu kaqeybgalo" macneheedu waa in cunuga laga filaayo inuu ka qeybgalo jadwalka hawlaha loo ansixiyey qoyska, oo xaadiriskiisu aanu kugu kalifay culays dheeriya.

## MAALMAHA FASAXA

Ogolaanshaha qeybta bilaha waxa ku jira lacagta daryeelka la qorsheeyey ee maalmaha fasaxa ee hoos lagu xusay. Waxaad dooran kartaa inaad furnaatid maalinta fasaxa ama xidhid maalinta fasaxa ee badelka maalin kale sanadka gudihiisa.

- Maalmaha Fasaxa Kuhaboon Waa:
  - Maalinta Sanadka Cusub, Janaayo 1
  - Martin Luther King Jr. Maalinta, Isniinta Saddexaad ee Janaayo
  - Maalinta Madaxweynayaasha, Isniinta Saddexaad ee Febraayo
  - Maalinta Xuska, Isniinta ugu Dabeysa May
  - Juneteenth, Juun 19
  - Maalinta Madaxbanaanida, Julaay 4
  - Maalinta Shaqaalaha, Isniinta Koobaad ee Sabteembar
  - Maalinta Mujaahidiinta, Noofeembar 11
  - Khamiista Thanksgiving, Khamiista Afraad ee Noofeembar
  - Maalinta Dhaxalka Dhaladka Mareykanka, Jimcaha Afraad ee Noofeembar
  - Maalinta Christmas-ka, Diseembar 25

## MAALMAHA TABABARADA CAALAMIGA

Ilaa shan maalmood tababar aqooneed ah ayaa sanadkiiba lagu daraa qeybta ogolaanshaha bilaha. Maalmo kale oo kasta oo shanta maalmood ee tababarka aqoooneed ka badan oo aad u xidhid tababar awgeed waxa loo tixgalinayaa maalmo xidhnaansho lamana dalban karo.

Tababarka Biilka Kabka ee CBA ee adeeg-bixiyayaasha daryeelka caruurta guriga qoyska ee liisanka iyo shahaadada haysta waxa mqcuula inaan loo dalban karin maalin tababar aqooneed.

## GO'AAMINTA MAALMAHA XIDHITAANKA

Marka bixiyuhu ay xidhaan ganacsiyadooda maalinta caadiga ah ee la shaqaynayo, maalmahaas waxa loo tixgalinayaa maalmo xidhitaan. Haddii lagasoo warbixin kahor qaan-sheegta, DCYF waxay hagaajinaysaa ogolaanshaha si kaliya looga jawaabo maalmaha furitaanka, wakhtiga yaraynta akoonka ee maalmaha xidhitaanka. Haddii aan lagasoo warbixin kahor qaan-sheegta, DCYF waxay bilaabaysaa lacag bixin kabadan xadiga.

Tusaaleyaal:

- *Bixiyuhu wuxuu xidhnaa 4/1/22 - 4/7/22. Maalmaha caadiga ah ee ay shaqeeyaan waa Isniinta ilaa Jimcaha. Kaliya waxa jira uun shan cisho oo xidhnaansho sida 4/2/22 iyo 4/3/22 waa maalmaha fasaxa todobaadka, maalmahan caadi ahaan ma furna.*
- *Bixiyuhu wuxuu xidhnaa 1/1/22 - 1/5/22. Maalmaha caadiga ah ee shaqadu waa Isniin ilaa Axad. Waxay dooran karaan inay sheegtaan 1/1/22 maalin fasax, taasoo la macno ah kaliya waxa jira afar cisho oo xidhnaansho.*
- *Bixiyuhu wuxuu furan yahay 5/1/22 - 5/10/22, wuxuuna xidhay 5/11/22 - 5/17/22, furay 5/18/22 - 5/31/22. Maalmaha caadiga ah ee shaqadu waa Isniinta ilaa Jimcaha. Waxa jira todoba cisho oo fasax ah oo kalaandarka kujira, si kastaba ha ahaatee kaliya shan cisho ayaa ahaa maalmo shaqo, sidaa darteed shan cisho waa xidhnaansho.*
- *Bixiyuhu wuxuu furan yahay 5/1/22 - 5/10/22, wuxuuna xidhay 5/11/22 - 5/17/22, furay 5/18/22 - 5/31/22. Maalmaha caadiga ah ee shaqadu waa Isniin ilaa Axad. Waxa jira todoba maalmood oo fasax ah oo kalaandarka kujira.*

  Xisaabinta: DCYF waxay iskuqaybinaysa xadi bil oo dhamaystiran 30.42 si loo helo xadi maalinle ah (muddo gaaban kadib laba god oo tobanlay ah) oo ku dhufo tirada maalmaha xidhitaanka.

  Tusaale: Bixiyuhu wuxuu xidhanyahay saddex cisho oo bisha oo dhamaystirana waa $568

  - $568 / 30.42 = $18.671926 maalintiiba, marka lasoo gaabiyana waa $18.67
  - -$18.67 x 3 maalmood = **$56.01 laga yareeyay qaybaha bishii**

## OGOLAANSHAHA QAYBTA BISHA

DCYF waxay u qoondaysay qaybta bishii markaa ogolaanshuhu uu kayar yahay bil dhamaystiran. Nidaamka SSPS wuxuu u qaybiyaa bisha oo dhamaystiran 30.42 si loo helo xadi maalinle ah (lasoo gaabiyay kadib laba tiro oo tobanlay ah) oo ku dhufo tirada maalmaha ogolaanshaha ee la furanyahay.

Tusaale: Ogolaanshaha mudada 4/1/22 - 4/15/22, 15 cisho oo kalaandarka kujira.

- Qaybta bisha dhamayska tiran $568.
- -$568 / 30.42 = $18.671926 maalintiiba, marka lasoo gaabiyana waa $18.67.
- $18.67 x 15 maalmood = $280.05 = **qaybta bilaha ah ee lasoo gaabiyay**

## NONSTANDARD HOURS BONUS (MAALMAHA DHEERIGA, NSHB)

Maalmaha dheeriga waxa lagu qayexaa:

- Saacadaha maalmaha shaqada ka hor 6 am. ama ka dib 6 p.m.
- Sabtiyaha iyo Axadaha
- Maalmaha Fasaxa ku Haboon

DCYF waxay u ogolaan doontaa $150 NSHB hal mar bishii cunugiiba haddii uu u baahan yahay 30 saac ama ka badan daryeelka maalmaha dheeriga.

Waxaad u dalban kartaa NSHB cunuga haddii aad siisid daryeel 30 saac ama kabadan maalmaha dheeriga bishaasi. Gali "1" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta. Haddii aad bixisay wax ka yar 30 saac daryeelka saacadaha dheeriga ee bishaasi, ha dalban NSHB. Gali "0" sanduuqa"Wadarta Qeybaha" ee qaansheegta.

Haddii laguu ogol yahay inaad bixisid daryeelka saacadaha maalmaha dheeriga oo aad bixisay ugu yaraan 30 saac daryeel ah bisha inta lagu jiray wakhtiga NSHB, waxa lagugula talinayaa inaad ku dalbatid NSHB qaansheegtaada bilkasta oo aad bixisay daryeelka.

Haddii laguu ogol yahay bisha qeyb ahaan, waa inaad hubisaa in daryeelka maalmaha dheeriga ee la bixiyey bisha qeyb ahaan buuxiyey 30 saac ugu yaraan. Tusaale ahaan, haddii laguu ogol yahay bilowga 15-ka bisha ilaa dhammaadka bishaasi, waa inaad bixisaa daryeel 30 saac ama maalmaha dheeriga inta u dhaxaysa 15-ka iyo dhammaadka bisha si aad u dalbatid NSHB bishaasi.

## LACAGTA SAFARADA/HOR U QAADISTA TAYADA

Haddii aad leedahay siyaasad qoran oo lacag lagaga qaado qoysaska iskood u bixiya lacagta, safarada ama kor u qaadista tayada, DCYF waxay magdhawi kartaa kharashkaaga saxda ilaa $30 cunugiiba bishii, iyadoo da'da loo fiirin. Sanadkiiba, waxa jirta maalgalin xadidan oo lagu bixinayo lacagta safarada/kor u qaadista. Haddii maalgalintu dhamaato, lacagta safarka/kor u qaadista tayada lama bixin doono.

Lacagta safarka/kor u qaadistu waxay daboolaysaa hawlo gaara sida:

- Kharashaadka galitaanka meelaha sida beerta xayawaanka, masxafka, filimada, iyo barkadaha dabaasha
- Barnaamijyada horumarinta iyo casharada socda sida fasalada luuqada, jiimka, iyo casharada dabaasha
- Gadiidka dadweynaha ama magdhowga masaafada ee masaafada OFM heerka magdhowga (waxa laagaga baahan karaa inaad bixisid rashiidka si aad u xaqiijisid kharashaadka)
- Kharashka shaqaaleysiinta cida aan ahayn shaqaale sida madadaaliyayaasha, faro-raaca, iyo fanaaniinta
- Iibsashada manhajka barbaarinta
- Manhajka loo diyaariyey adeeg-bixiyaha iyo midka DCYF ansixisay

Lacagta safarka/kor u qaadistu ma daboolayso:

- Lacagaha ama kharashaadka galitaanka dadka waaweynee ee safarka
- Agabka ama qalabka loo baahan yahay in lagu buuxiyo shuruudaha liisanka
- Cuntada la iibsaday marka safarka

Si aad si saxa ugu dalbatid magdhowga safarka ama kor u qaadista hawsha:

1. Haddii xadiga dalabka saxda ah ee safarka ama kor u qaadista hawshu ka yar yahay $30, dalbo kharasha saxda ah, kunasoo duub doolar ugu dhow. Tusaale ahaan, haddii kharashku ahaa $10 gali "10" sanduuqa Qeybta Wadarta ee qaansheegta
2. Ha dalban lacagta safarka/kor u qaadista haddii cunug aanu ka qeybgalin. Xaaladani, gali "0" sanduuqa Qeybta Wadarta ee qaansheegta cunuga
3. Hayso rasiidhada muujinaya kharashka safarka/kor u qaadista hawlaha iyo liiska caruurta ka qeybgashay
4. Markay codsato DCYF, waa inaad ku gudbisaa rasiidhada 45 maalmood codsi gudihiisa. Haddii aanad ku bixin diwaanada 45 maalmood gudohood, lacag-dheeriya ayaa lagu qori karaa xadiga bisha oo dhan la dalbaday ee bishaasi

Haddii aad ku kharash gareynaysid waxka badan $30 cunugiiba safarada ama hawlaha kor u qaadista tayada ee bisha, waxaad weydiisan kartaa qoyska oo hela kabka daryeelka caruurta inay bixiyaan kharashka haddii lagaa qaadayo lacagtaasi qoysaska iskood iskaga bixiya. Haddii waalidku doorto inay bixiyaan kharash dheeriya, waxaad go'aansan kartaa inaanad gayn cunuga safarada ama cunugu ka qeyb qaato hawlaha horumarinta tayada. Haddii cunugu aanu tagin ama ka qeybgalin hawlaha, waa inaad wali siisaa daryeelka ku haboon ee horumarinta cunugaasi inta lagu jiro wakhtiga safarka ama hawsha horumarinta tayada.

## DHIIRIGALINTA HEERKA CUNUGA

Dhaqangalinta Julaay 1, 2024, DCYF waxay u oggolaan doontaa kordhinta heerka cunuga ilaa $300 bishiiba, cunug kasta, oggolaanshaha kabka daryeelka cunuga ee bixiyashaa daryeelka cunuga ee diwaangashan lana aqoonsanyahay kuwaasoo:

- Aqbalaya kabka gobolka
- Kaqaybqaado oo waa meel wanaagsan Early Achievers Quality Rating and Improvement System (Qiimaynta Tayada Barbaarinta Caruurta iyo Hagaajinta Nidaamka, QRIS)
- Daryeelka caruurta laga bilaabo dhalashadooda ilaa 11 bilood

Si aad u codsato kor u qaadista heerka cunuga gali "1" ee "Wadarta Qaybaha" khaanada kujirta qaan-sheegta. Haddii aanad buuxin shuruudaha sare, ha codsan kor u qaadista heerka cunuga.

## JOOJINAHA AAN LA QORSHEYN

Haddii qoysku aanu ku habooneyn kabka daryeelka caruurta ka hor dhamaadka mudada ogolaanshaha, DCYF waxay soo ogeysiinaysaa adiga iyo qoyska. Haddii aad siisay ciwaankaaga iimaylka DCYF, waxaad heli doontaa ogeysiiska iimaylka iyo sidoo kale iimayl caadiya.

DCYF waxa looga baahan yahay inay ku siiso ogeysiis qoran 10 maalmood ka hor joojinta aan la qorsheyn ee inta badan, waxaanad dalban karta 10 kaasi maalmood. Haddii ogeysiiska joojinta la kordhiyo ilaa bisha xigta, waxaad dalban kartaa daryeelka maalmaha cunuga la filaayey inuu ka qeybgalo inta lagu jiray mudada 10 cisho ee joojinta, xataa haddii cunugu aanu ka qeybgalin bishaasi.

Barnaamijyada daryeelka caruurta Xanaanada Caruurta, u tixgali Qodobka 9.5 ee CBA ama la xidhiidh shaqaalahaaga bulshada.

## SAACADAHA BAAHIYAHA GAARKA

Fiiri boga 14 ee Qeybta Baahiyaha Gaarka hagahan.

## LACAGTA ISDIWAANGALINTA

Haddii aad leedahay siyaasad qoran si aad uga qaadid lacagta isdiwaangalinta qoysaska iskood u bixiya, waxaad dalban kartaa $50 lasheegay ee cunugiiba ama lacagta isdiwaangalinta lasheegay sanadkiiba, kolba mida yar. Haddii aad ka qaadid lacagta isdiwaangalinta sanadlaha, wac Khadka Adeeg-bixiyaha si aad u codsatid dibu ogolaanshaha lacagta isdiwaangalinta sanadkiiba. Waxa macquula inaanad dalban lacagta isdiwaangalinta dheeriga marka cunugu ku jiro daryeelkaaga lakiin barnaamijyada kabku isbadelaan.

Waxaad dalban kartaa lacagta isdiwaangalinta:

- Marka cunugu hela kabku marka hore isdiwaangaliyo daryeelkaaga, xataa haddii cungu aanu ka qeybgalin
- Marka cunuga hela kabku ka baxo daryeelkaaga kunasoo noqdo in ka badan 60 cisho ka dibm xataa haddii ay tahay isla sanadkaasi
- Sanadka kasta, haddii aad leedahay siyaasad qoran oo aad lacag ka qaadid qoysaska dhammaantood lacagta isdiwaangalinta sanadlaha

Ka wac Khadka Adeeg-bixiyaha gobolkoo dhan 1-800-394-4571 ama iimayl u dir **providerhelp@dcyf.wa.gov** wixii macluumaad dheeriya.

## ADEEGYADA HALKA MAR AH EE LA OGOLAADAY

Adeegyada halka mar ah ee laguu ogolaaday, sida magdhowga tababarada ama waxbarashada ama dhiirigalinta.

## Gudbinta Codsiga Lacag-bixinta

Waxa jira dhowr qaab loo loo gudbiyo dalabkaaga/codsigaaga DCYF. Ka hor intaanad gudbin qaansheegtaada, ku buuxi qeybaha daryeelka aad siisay cunugiiba qaansheegta, saxeex oo taariikh ku qor. Waa inaad ku gudbisaa dalabkaaga saddex bilood gudohood taariikhda qaansheegta.

Gudbi qaansheegtaa adoo isticmaalaya kaliya ikhtiyaaradan soo socda:

### BOOSTADA

Nuqulka boostada ee qaansheegtaada dhameyskatiran ugu dir DCYF halkan:

Washington State Department of Children,
Youth & Families
SSPS
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812

### TILIFOONKA

Ka wac Qaansheegta halkan 1-888-461-8855. Tilmaamaha sida loo isticmaalayo Qaansheegta waxa laga heli karaa **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf**.

### QEYBTA WEBSAAYDKA SSPS

Tilmaamaha sida loo gali karo lana iskaga diwaangalin karo qeybta adeeg-bixiyaha wabsaaydka SSPS waxa laga helayaa **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf**. Waxa jira saddex qeybood oo muhiima nidaamka isticmaalka:

- Qeybta 1: Ka sameyso akoon isticmaale Secure Access Washington (Isticmaalka Badqaba ee Washington, SAW) halkan **secureaccess.wa.gov**
  - Haddii aad dhib kala kulantid sameysashada akoonkaaga SAW, wac adeega daryeelka macmiilka SAW oo la helayo 24 saac maalintii, todobo cisho todobaadkii, halkan 1-855-928-3241
- Qeybta 2: Iska Diwaangali Qeybta Adeeg-bixiyaha
- Qeybta 3: Diwaangali Ogolaanshaha Laqabsiga

## Helitaanka Lacagta

Dhamaan adeeg-bixiyayaasha cusub waxay heli doonaan lacago lagasoo saaray dhigaalka tooska ah. Haddii aanad heli karin haayad maaliyadeed, waxaad ugu gudbin kartaa codsiga qoraal adoo tilmaamaya tixraaca lacagta ay boostada Adeega Dadweynaha U.S soo dirtay.

### LACAG-DHIGAALKA TOOSKA AH

Dalbashada qaansheegta loo gudbiyey lacag-bixinta ee lacag-dhigaalka tooska waxa la diyaariyaa maalinta ugu danbeeysa ee bisha qaansheegta ama taariikhda gudbinta, kolba kii danbeeya. Lacag-bixinta lacag-dhigaalka tooska ah waxay dhacday 3-5 maalmo shaqo ka dib taariikhda diyaarinta qaansheegta.

Akoonada cusub ee dhigaalka tooska ama si aad wax uga badeshid akoon aad horey u lahayd, waxaad marka hore dhameystiri kartaa Diwaangalinta Lacag-dhigaalka Tooska/foomamka W9 elektaroonig ahaan (looga helaayo onlaayn **www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit**), oo ka dib daabac oo udir, ama iimay ama faakis ugu dir foomamka:

SSPS Provider File Unit
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504
Faakis: 360-902-8268

Ka codso nuqulka warqada codsiga halkan **DSHSSSPSWeb@dshs.wa.gov** ama adoo wacaya 360-664-6161 (Ikhtiyaarka 1). Hubi inaad u sheegtid SSPS inuu yahay akoon cusub ama aad badelaysid akoon hore u jiray.

Miyaad caawimo uga baahan tahay buuxinta foomamka? Ka akhri Tilmaamaha Isdiwaangalinta Lacag-dhigaalka Tooska onlaayn **ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit**.

**BOOSTADA**

Qaansheegta la dalbado inta u dhaxaysa 1-da iyo 4:30 p.m. ee 15-ka waxa lasoo saari doonaa 16-ka ama maalinta koobaad ee shaqo ka dib. Haddii 15-ku noqoto maalmaha fasax todobaadka ama maalin fasaxa, markaa waa 4:30 p.m. malinta u danbeysa ee shaqo ka hor 15.ka.

Dalabyada qaansheegta ee la gudbiyey ka dib 4:30 p.m. ee 15-ka malinta u danbeysa ee shaqo ee bisha wax lasoo saari doonaa maalina koobaad ee shaqo ee bisha ku xigta.

Lacag-bixinta laga sameeyey boostada gali Adeega Boostada U.S ilaa saddex maalmo shaqo ka dib diyaarinta. DCYF ma damaanad qaadi karto taariikhda gudbinta ee jeegaga uu soo diray Adeega Boostada U.S.

Waxaad ka heli kartaa jadwalka muujinaya taariikhaha dalabka iyo waaranka xiga (hubi) taariikhaha boosta **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf**.

## Heerka Daryeelka Caruurta Baahiyaha Gaarka

Heerka baahiyaha gaarka waa daryeelka aad siisid cunuga leh baahiyo gaara oo ka sareeya kana baxsan daryeelka caadiga ah. DCYF ma bixiso lacagta tababarka, waxkabadelka dhismaha, ama qalabka.

Waxa lagu siin karaa lacagta heerka dheeriga si aad u daryeeshid caruurta iyo dhalinyarada:

a. Ilaa da'da 19 ee leh xaalad jidheed, maskaxeed, dareen, ama hab-dhaqan la xaqiijiyey oo u baahan daryeelka gaara oo heerkiisu sareeyo; ama
b. Da'da 13 ilaa 19 oo ku jira kormeer maxkamadeed

Daryeelka caruurta baahiyaha gaarka ah leh waxa loo ogol yahay Heerka 1 iyo Heerka 2 Heerka baahiyaha gaarka waxa la bixiyaa lacagta dheeraadka ee daryeelka cunuga heerka maalinlaha oo waxa loo diyaariyaa qaansheegta qeyb bile ah tirada saacadaha daryeelka la qorsheeyey.

### Heerka 1aad

Ogolaanshaha Heerka 1 waa heerka baahiyaha gaarka la islaqaatay ee gobolka. Ka hor heerka baahiyaha gaarka ee Heerka 1 waa la ogolaan karaa, adiga iyo qoysku waa inaad dhameystirtaan foomka Special Needs Child Care Rate Request (Heerka Daryeelka Caruurta Baahiyaha Gaarka), oo lagag helaayo onlaayn **https://www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=12-001&title**=. Foomka waa inay saxeexaan boosto ama faakisna kusoo diraan DCYF:

Child Care Subsidy Contact Center
P.O. Box 11346
Tacoma, WA 98411-9903
Faakis: 1-877-309-9747

### Heerka 2aad

Qoysku wuxuu kaala shaqeynayaa adiga iyo DCYF inaad go'aamisaan in cunugoodu u qalmo Heerka 2 ee heerka baahiyaha gaarka. Waxa intaasi dheer foomamka Codsiga Heerka Daryeelka Caruurta Baahiyaha Gaarka, DCYF waa inay ka heshaa xaqiijin qoraala khabiir caafimaad, caafimaad-maskaxeed, adeeg bulsho, ama waxbarasho oo haysta ugu yaraan shahaadada Mastarta ama labaad, ama kalkaaliso diwaangashan. Qaxiijintu waa inay sheegtaa heerka daryeelka dheeraadka ah ee loogu baahan yahay daryeelka cunuga kana sareeya ee ka baxsan waxaad siin lahayd caruurta bilaa baahiyaha gaarka ah.

Macluumaad dheeriya oo khuseeya baahiyaha gaarka, u tixgali Qodobka CBA ee 10.5 **https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf**.

### Qaladaadka Lacag-bixinta

Wakhtiga kuu xadidan ama sheegida lagu saxaayo qalad lacag-bixineed iyo raadinta dibu bixin lacageed waa:

- Labo sano haddii qaladku yahay heerka lagu bixiyey da'da ama gobolka. Xadidkan labada sano ah ma qabanaayo baadhitaanada fadaraalka, oo noqon kara saddex sano
- Ilaa saddex sano haddii qaladku yahay arin kale



## Qaladaadka Lacag-bixin Yaraanta

Lacag-bixinta yar waxay u dhacdaa qalad qaansheegta ka yimaad awgeed. Haddii aanad helin lacagta waxkasto oo aad ku dalbatay qaansheegtada ama haddii lagu siiyey heerarka qaldan, raac talaabooyinka hoose:

1. Isla fiiri qaansheegta iyo diwaankaaga si aad u aragtid in magaca cunugu ku jiro qaansheegta
2. Isbarbardhig diwaanka xaadiriska iyo qaansheegtaada si aad u aragtid in lagu siiyey lacag ka hooseysa xaqaaga
3. Ka wac Khadka Adeeg-bixiyaha 1-800-394-4571 si aad u sheegtid lacag-bixin yar

Si aad u saxdid lacag-bixin yar, waa inaad u gudbisaa qaansheegta lacag-bixinta adeegyada daryeelkacunuga in aan ka yareyn saddex bilood ka dib taariikhda qaansheegta. Khilaafyada ku aadan lacag-bixin yar waa laga xumaadaa. Fiiri CBA Lifaaqa E **https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf**.

## Qaladaadka Lacag-bixinta Dheeriga

Haddii lagu siiyo lacag ka badan intaad lahayd waxay keenaya:

- Ma isticmaashid nidaamka xaadiriska elektarooniga ee ay ansixisay DCYF ama ma lihid ka reebanaan la ansixiyey
- Ma lihid diwaanada xaadiriska ee sheegaya diwaanka dalabkaaga (WAC 110-15-0034)
- Waxaad heshay lacag-bixin heerar qaldan ah
- Ma lihid rasiidhada saxda ah ee taageeraya lacag-bixinta
- Waxaad lacag ka qaaday safar/kor u qaadis tayo iyo diwaangalin aan lagu sheegin siyaasada

1. Haddii aad ka shakida in lagu siiyey in ka badan intaad lahayd, wac Khadka Adeeg-bixiyaha 1-800-394-4571 ama iimayl ugu dir **providerhelp@dcyf.wa.gov**. Waxay xalin karaan qaladka ka hor intaan DCYF sameyn lacag-bixin dheeriya dhanka Office of Financial Recovery (Xafiiska Sookabashada Maaliyadeed, OFR).
2. DCYF waxay ilaalisaa lacag-bixinta daryeelka caruruta ee qaladaadka dhici kara. Si loo dejiyo in qaladku yahay sax, DCYF waxay dibu fiirisaa xaadiriska ama ku weydiisaa inaad bixisid nuqulada diwaankaaga. Markay codsato DCYF, waa inaad ku gudbisaa rasiidhada 45 maalmood codsi gudihiisa. Waxa muhiima inaad ka jawaabtid codsi kasta oo diwaanada xaadiriskaaga ah. Waxaad la xidhiidhi kartaa DCYF adoo ka codsanaya diwaanada una tixraacaya macluumaadka xidhiidhka ee lagu daabacay codsiyada.

3. Haddii qalad la ogaado inuu jiro oo lacag bixin dheeriya la sameeyo, waxaad ka heli doontaa Ogeysiiska Lacag-bixinta Dheeriga OFR. Ogeysiiskan waxa ku jira:
   a. Sababta, nooca lacag-bixinta dheeriga, caruurta ay khusayso iyo wakhtiga lacag-bixinta dheeriga
   b. Tilmaamaha sida dib loogu bixinaayo lacag-dheeriga (qorshayaasha lacag-bixinta ayaa la heli karaa)
   c. Tilmaamaha sheegaya sida loo tabinaayo lacag-bixinta dheeriga. Waxaad la xidhiidhi kartaa waaxda sameysay lacag-bixinta dheeriga (ka fiiri ogeysiiska lacagta dheeriga ee macluumaadka xidhiidha gaarka) wixii xal macquula waxaanad codsan kartaa Dhageysiga Maamulka si loo xaliyo lacag-bixinta. Si aad u codsatid dhageysiga, waa inaad:
      i. U dirtaa codsigaaga dhageysiga adoo maraya boosto soo celin rasiidh ama qaab kale oo cadeynaya helitaanka OFR.
      ii. Hubi in codsiga dhageysiga laga helay OFR 28 maalmood gudohood taariikhda aad heshay Ogeysiiska Lacagta-dheeriga.
      iii. Oo ay ku jiraan sababta aad ugu maleynaysid lacag-bixinta dheeriga ay qalad u tahay oo ku dar nuqulka Ogeysiiska Lacagta-dheeriga. Haddii lacag-bixinta dheeriga aan la xalin adoo la hadlaya shaqaalaha Adeeg-bixiyaha DCYF ama maraya dhageysiga maamulka, waa inaad dibu bixisaa lacagta.
4. Ka dib Ogeysiiska Lacag-bixinta marka laguusoo diro iyadoo la maraayo boosto ama adeeg gaara, OFR waxay bilaabi doontaa talaabada ururinta ka dib 30 maalmood ugu yaraan. Haddii codsiga dhageysigu ka badan yahay 28 maalmood ka dib helitaanka ogeysiiska, talaabadan ma joojin doonto nidaamka dhageysiga.
5. Ogeysiis kasta oo lacag-bixin dheeriya waa arin gaara. Waxaad ka heli katraa ogeysiisyo lacagta dheeriga ah oo dheeraada intaad sugaysid hal ama dhowr nidaam dhageysi.
6. Khilaafyada ku aadan lacag-bixin dheeriga waa laga xumaadaa. Haseyeeshee, waxaad xaq u leedahay inaad codsatid dhageysi maamul.

Markaad dibu bixinaysid lacag-dheeriga, waxa muhiima inaad ogeysiisid Qeybta Cashuura si loo hubiyo inay ka warhayaan oo ay sameyn karaan isbadellada daruuriga ah ee khuseeya soosheegida cashuurta. Ka fiiri qeybta Macluumaadka Cashuurta wixii macluumaad xidhiidh ah.





## Lacagta Adeegyada aan la Ogolaan ee Qoysaska

Waxaad ka qaadi kartaa lacagta qoysaska hela kabka daryeelka caruurta ee adeegyadan soo socda kaliya haddii aad leedahay siyaasad qoran oo aad kaga qaadid lacagta qoysaska.

- Daryeelka caruurta ee dheeriga u ah sababo gaara, sida balamaha gaarka laguma daboolin ogolaanshahan
- Barnaamijyada ikhtiyaarka laguma daboolin lacagta safarka/kor u qaadista
- Safarka ama kor u qaadista tayada ee ka badan $30 magdhowga ugu badan ee barnaamijyada kabka daryeelka caruurta
- Barnaamijyada cuntada ikhtiyaarka ee aad siisid qoysaska aan siin qado cunugooda
- Gadiidka lagu tagayo lagagana imanayo dugsiga iyo hawlaha
- Soo qaadista danbe ee cunuga ka dib saacada shaqada
- Lacagta habsanka ee badhka lacagta daryeelka cunuga
- Lacagaha Non-sufficient funds (Maalgalinaha Dhiman, NSF) ee bangiga marka maalgalinaha bangigu aanay diyaarin ahayn

Waxa laga yaabaa inaanad ka qaadin lacag qoysaska hela kabka daryeelka caruurta:

- Baaqiga kasoo hadha xadiga kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka ee ugu badan iyo xadiga lacagta ee gaarka ah la iskakag bixiyo, hadii xadiga uu badan yahay.
- Lacagta isdiwaangalinta marka ay ka badan tahay lacagta diwaangalinta ugu badan ee barnaamijka kabka
- Lacagaha waxqabadka si loo diyaariyo lacagta qoyska
- Lacagaha qalabka, agabka ama qalabka loo baahan yahay in lagu buuxiyo shuruudaha liisanka
- Kharashaadka dalbashada dacwadaha u dhaxeeya adiga iyo dawlada
- Maalmaha aad xidhid shaqada

## Siyaasadaha Qoran

Waa inaad leedahay siyaasado qoran oo faahfaahinaya xadiga lacagta aad ka qaadid adeegyada iyo lacagaha safarka/kor u qaadista tayada iyo diwaangalinta sida uu u baahan yahay WAC laguna aqoonsaday CBA. Lacagaha laga qaado qoysaska iskood u bixiya waa inay waafaqsanaadaan lacagaha qoysaska la kabay.

Markay codsato DCYF, waa inaad ku gudbisaa nuqulka siyaasada qoran 45 maalmood codsi gudihiisa. Haddii aanad ku bixin nuqulka 45 maalmood gudohood, lacag-dheeriya ayaa lagu qori karaa xadiga dhamaan aad dalbatay wakhtigaasi.

## Macluumaadka Cashuuraha

DCYF waxay boostu ugu dirtaa diwaanka lacagta ee loo yaqaan Warqada Diritaanka. Tani waxa ku jira liiska waxyaabaha laga jaray ee loo isticmaali karo ujeedooyin cashuureed, oo ay ku jiraan lacaga ururada. Haddii qofka ama shirkadu rabto inay xaqiijiso dakhligaaga, waa inaad siisaa warqada diritaanka. Waxoogaa ka mida macluumaadka warqada diritaanka ayaa qarsoodi ah oo ay tahay inaan la sheegin. Waxay la mid tahay qeyb lacageed.

Haddii aad u baahan tahay wax dheeraad ku ah warqada diritaanka, waxaad ka codsan kartaa foomka "cadeynta dakhliga" ee DCYF. Ugu dir codsigaaga oo qoraala:

SSPS Attn: Evidence of Income
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812
Iimayl: **SSPSvoe@dshs.wa.gov**
Xaqiijinta Mushaharka ee Faakis: 360-664-6103

DCYF ma haysato cashuuraha dakhliga ee lacagta DCYF. DCYF waxay usoo sheegtaa dakhliga aad naga heshay anaga Internal Revenue Service (Adeega Dakhliga Gudaha, IRS). Waxaad uheli kartaa foomka W-2 ujeedooyin dakhli cashuureed. Haddii aad qabtid su'aalo cashuurta ah, fadlan la xidhiidh IRS. Wixii macluumaada ee khuseeya bayaanka cashuuraha:

Bilaash ku Wac: 833-725-3502, ikhtiyaar 1
Iimayl: **dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov**

## Early Achievers

Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) waa nidaamka Washington ee aqoonsiga tayada daryeelka iyo horumarinta cunuga. Adeeg-bixiyayaasha ayaa la siiyaa heer qiimeyn laga bilaabo 1 ilaa 5. Adeeg-bixiyayaasha daryeelka cunuga ee liisanka haysta kana qeybgala Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) waxay heli karaan Magdhowga Dheeriga ee boqolkiiba xadiga kabkooda bilaha. Dhiirgalintani waa boqolkiiba lacagta la bixiyo kala badhka maalmaha bilaha, maalmaha qeybta ah, iyo maalmaha labada galinba ee daryeelka kabka uu dalbaday adeeg-bixiyuhu. Kuma jiraan lacaga safarada, lacagaha dheeriga ee sacaadaha dheeraadka, baahiyaha gaarka, diwaangalinta, ama korodhka iyo dheeraadka kale. Madhowga Dheeriga Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) waxa loo bixin doonaa lacago dheeraada.

Adeeg-bixiye kasta oo bilaaba aqbalida lacagaha kabka ka dib 12 bilood ama waxka badan isagoo aqbalin kabka waxa loo tixgalinayaa adeeg-bixiye kab cusub. Tani waxa ku jira adeeg-bixiyayaasha liisamada cusub. Dhammaan adeeg-bixiyayaasha kabka cusub waa inay buuxiyaan shuruudahan soo socda:

- Iska diwaangaliyaan Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) 30 maalmood gudohood helitaanka lacagta kabka hore
- Ku dhameystiraan Borofaylka Hore 12 bilood isdiwaangalinta gudoheed Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) ama lacagta kabka koobaad, kolba kii danbeeya
- Kusoo gabagabeeyaan Tayada Heerka 3 ama ka sareeya 30 bilood gudohood isdiwaangalinta Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) ama lacagta kabka koobaad, kolba kii danbeeya. Barnaamijka waxbarashada barbaarintu masoo gabogabeynaayo heerka tayada ee wakhtigan kumana haboona inuu helo kabka daryeelka caruurta ilaa heerka tayada loo baahan yahay la gaadho
- Ilaaliyaan Tayada Heerka 3 ee barnaamijka barbaarinta ama ka sareeya iyagoo dhameystiraya Wareega Aqoonsiga Tayada saddex sano oo kasta

Adeeg-bixiyayaasha kabka ee qaata Heerka Tayada 2 waa inay dhameystiraan hawlaha xalinta oo kusoo gabogabeeyaan Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 12 bilood gudohood bilowga hawlaha xalinta. Adeeg-bixiye kasta oo kabka jira oo aan kusoo gabogabeyn Heerka Tayada 3 ama wax ka sareeya 12 bilood gudohood bilowga hawlaha xalinta kuma haboonaan doono inuu helo kabka daryeelka caruurta ilaa heerka tayada loo baahan yahay la gaadho.

Waxbadan ka ogow Early Achievers (Barbaarinta Caruurta) halkan **www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/early-achievers**.

## Jabinta-sharciga Barnaamijka

Marka loo fiiriyo WAC 110-15-0277, adeeg-bixiyayaasha waa inay u hogaansamaan dhamaan masuuliyadaha lagu sheegay WAC 110-15-0034, oo ay ku jiraan dalbashada saxda. Ku guuldaraysashada arintan waxa ka dhalan doonta jabinta shuruucda barnaamijka, iyo cunaqabatayn lasoo rogo oo lagu sheegay WAC 110-15-0279.



## Macluumaad dheeraad ah

### Macluumaadka Xiriirka

| | | |
|---|---|---|
| **SOO SHEEGIDA XADGUDUB IYO DAYACAAD**<br>1-866-ENDHARM<br>1-866-363-4276<br>**www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse** | **KA JAWAAB TILIFOONKA QOYSASKA**<br>Qoysaska loo ogol yahay WCCC ama SCC waxay hubin karaan xaalada kiiskooda iyagoo taabanaya 1 ka dibna wacaya Xarunta Wicitaanka Macmiilka DCYF<br>1-844-626-8687 | **QEYBTA HUBINTA XOGTA DCYF**<br>1-866-482-4325, ikhtiyaar 4<br>**backgroundcheck@dcyf.wa.gov** |
| **DCYF XARUNTA ADEEGA WICITAANKA MACMIILKA**<br>Qoysasku waxay codsan karaan adeegyada ama sheegi karaan isbadellada<br>1-844-626-8687<br>Faakis: 1-877-309-9747 | **XAADIRISKA ELEKTAROONIGA DCYF**<br>1-844-704-6777<br>**eas.servicedesk@dcyf.wa.gov**<br>**electronic.attendance@dcyf.wa.gov** | **KHADKA QAANSHEEGTA DSHS**<br>1-877-461-8855 |
| **ADEEGYADA KA DHAAFKA LIISANKA**<br>Dhibaatooyinka ama su'aalaha khuseeya nidaamka ansixinta FFN<br>1-866-482-4325, ikhtiyaar 8<br>**dcyf.ffn@dcyf.wa.gov** | **XUBINTA CAAWIMADA SEIU 925**<br>1-877-734-8673<br>**DARYEELKA CAAFIMAADKA SEIU 925**<br>1-866-771-7359 | **ADEEGA MACMIILKA SSPS**<br>360-664-6161<br>**dshs_sspsmail@dshs.wa.gov**<br>**QEYBTA ADEEG-BIXIYAHA SSPS**<br>1-855-928-3241 |
| **KHADKA ADEEG-BIXIYAHA WCCC**<br>1-800-394-4571<br>Faakis: 1-877-309-9747<br>**providerhelp@dcyf.wa.gov** | **XAFIISKA KORMEERAHA GUUD EE WAXBARASHADA DADWEYNAHA**<br>Wuxuu siiyaa maalgalinta fadaraalka si loogu adeego cuntooyin nafaqo leh iyo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Caruurta<br>360-725-6206 | **XAFIISKA SOOKABASHADA MAALIYADEED**<br>DSHS Economic Services Administration, Office of Financial Recovery, P.O. Box 9501, Olympia, WA 98507-9501<br>360-664-5700<br>Wicid bilaasha: 1-800-562-6114<br>TTY: 1-800-833-6388 |



## Macluumaadka Onlaaynka

- Shuruudaha Liisamada Guryaha Daryeelka Caruurta: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider**
- Heerarka Kabka Daryeelka Caruurta: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/subsidy**
- Shuruudaha iyo Shuruucda Kabka Daryeelka Caruurta: **apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15**
- Macluumaadka Nidaamka Xaadiriska Elektarooniga: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system**
- Tabobarka Nidaamka Xaadiriska Elektarooniga: **www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training**
- Qoysasku Waxay ka Codsan Karaan: **https://www.washingtonconnection.org/home/**
- Macluumaadka Khadka Qaansheegta: **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf**
- Shuruucda Liisamada iyo Kabka: **apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110**
- OFM Heerka Magdhowga Masaafada: **https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/legacy/policy/10.90a.pdf**
- Secure Access Washington (Helitaanka Badqaba ee Washington, SAW): **https://secureaccess.wa.gov/myAccess/saw/select.do**
  - Qeybta Taageerada: **https://secureaccess.wa.gov/public/saw/pub/help.do**
- SEIU 925 CBA: **https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf**
- Codsiga Heerka Baahida Gaarka: **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx**
- Taxanaha Bilawga Ganacsiga: **https://imaginewa.org/business-start-up-series**

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, muwaadinimada ama xaalada socdaal, da'da, wacyiga jinsi ama aqoonsiga jinsiga, mujaahid ama xaalada milatari, xaalada hooyada ilmaha naas-nuujinaysa, iyo helitaanka dareen kasta oo jidheed, ama naafanimo maskaxeed ama isticmaalka hagitaanka eyga ama adeegyada xayawaanku qabto. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka* ***communications@dcyf.wa.gov***

DCYF PUBLICATION EL_0041 SM (06-2024) Somali